



## Aaladaha iyo qaab-dhismeedka Heerarka Badbaadada Carruurta

## Tilmaame wax ku ool ah oo ku saabsan xulashada, kormeerka iyo horumarinta shaqaalaha ku habboon iyo mutadawiciinta

Xulashada shaqaale nabdoon iyo tabaruceyaal	Talooyin wax ku ool ah	Natiijooyin wanaagsan
Go'aami in booska/doorku uu xiriir toos ah ama aan toos ahayn la yeelan doono carruurta, ama helitaanka macluumaad xasaasi ah oo ku saabsan carruurta iyo qoysaskooda	Qiimaynta nooca xiriirka doorka uu la yeelan doono carruurta, iyo nooca helitaanka jiri doona ee ku aadan macluumaadka ku saabsan carruurta shaqsiyan, ayaa go'aamin doona: <ul style="list-style-type: none"><li>• in doorku sharci ahaan u baahan yahay Kaarka La shaqaynta Carruurta (Children Check), ama in loo baahan yahay Kaarka La shaqaynta Carruurta si loo yareeyo khatarta ku imaan karta carruurta</li><li>• haddii baaritaano iyo xaqiijin kale loo baahan yahay</li><li>• nooca tababarka iyo heerka kormeerka ee uu doorku u baahan doono.</li></ul>	Heerka saxda ah ee baaritaanka asalka, tababarka iyo kormeerka doorka ayaa meesha ku jiri doona.
Samee bayaan waajib ah ama sharaxaada shaqada	Bayaanka waajibaadka ama sharaxaadda shaqada ayaa iftiiminaysa howsha doorka, mas'uuliyadaha iyo filashooyinka booska waxayna qeexaysaa khadadka warbixinta.  Go'aami in shaqadu u baahan tahay Kaarka La Shaqaynta Carruurta (Working with Children Check), diiwaangelinta xirfada ama shahaado.	Qorista shaqaalaha ugu habboon ama mutadawiciinta.
Samee shuruudaha u muhiimka ah xulashada	Shuruudaha xulashada waxay gacan ka geystaan aqoonsiga xirfadaha muhiimka ah, sifooyinka iyo waayo-aragnimada loo baahan yahay si loo fuliyo waajibaadka iyo howlaha lagu qeexay bayaanka waajibaadka.	Xulashada qofka saxda ah ee loo xulanayo shaqada ayaa sahlanaan doonta haddii aad hore uga sii fikirto waxa aad u baahan tahay.
Xayeysiiso booska shaqada	xayaysii inaad tahay urur ilmaha amnigooda ku da'daala oo leh Nidaamka Badbaadada iyo Samaqabka Carruurta (Child Safety and Wellbeing Policy).	Wuxuu cadeeyaa in badbaadada carruurta ay qayb ka tahay dhaqanka ururkaaga oo ayna kaa caawineyso inaad soo jiidato dadka leh qiyamka uu ururkaagu leeyahay oo kale.

Xulashada shaqaale nabdoon iyo tabaruceyaal	Talooyin wax ku ool ah	Natiijooyin wanaagsan
Codsadayaasha wareysiga shaqada	<p>Weydii codsadhaha shaqada waxa ku dhiirgalinaya inuu la shaqeeyo carruurta.</p> <p>Weydii codsadhaha shaqada su'aalo ku saabsan waayo-aragnimada nolosha dhabta ah iyo fahamkooda ku aadan:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• baahida jireed iyo mida shucuureed ee carruurta</li> <li>• xuduudaha xirfadeed</li> <li>• xuquuqda carruurta.</li> </ul> <p>Wax ka ogoow codsadhaha shaqada waxa qiimaha u leh iyo inay la jaan qaadi karaan ballanqaadka badbaadada carruurta iyo samaqabka iyo ka hortagga xadgudubka carruurta iyo waxyeelada.</p> <p>Ka wada hadla codsadhaha shaqada qaababka ay u abbaaraan dhaqanka Aborijiniska iyo dhaqamada loo dhan yahay ee dhammaan carruurta iyo qoysaskooda.</p> <p><b>Su'aalo waxtar leh:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Fadlan liis ku qoro khibradahaaga (haddii ay jiraan) ku aadan la shaqeynta carruurta iyo dhalinyarada, ama ururada la shaqeeya carruurta iyo dhalinyarada. Tani waxay ahaan kartaa noloshaada xirfadeed iyo noloshaada gaarka ah (oo ay ku jiraan doorarka iskaa wax u qabso sida doorarka isboortiga).</li> <li>• Fadlan tusaale ka bixi waxa aad u aragto inay tahay dhaqan wanaagsan iyo shaqan aan wanaagsanayn ee dhex mari kara qof weyn iyo ilmo ama qof dhalinyaro ah.</li> <li>• Maxaad sameyn lahayd haddii aad u maleyneyso in qof kula shaqeeya uu si aan habooneyn ula dhaqmayo ilmaha?</li> <li>• Sideed ku tilmaami lahayd habka aad ula macaamilayso carruurta iyo dhalinyarada?</li> </ul> <p>Guddiga xulashada ka dhigo hal qof ka badan si aad ugala hadashid aragtidda ku aadan codsadayaasha shaqada. Guddiga u xulo dad isku dhafan oo leh astaamo kana soo kala jeeda dhaqamo kala duwan haddii ay suurtagal noqon karto, sida isku dhafka jinsiga. Marka lagu daro qof dhalinyaro ah guddiga waxay kaa caawin kartaa inaad hesho aragti ka duwan.</p>	Nidaam oggolaanaya fursad macquul ah oo lagu qiimeeyo xirfadaha codsadhaha shaqada iyo ku habboonaanta isla markaasna ah cadaalad.

Xulashada shaqaale nabdoon iyo tabaruceyaal	Talooyin wax ku ool ah	Natiijooyin wanaagsan
	<p>Samee wareysi labaad haddii aadan hubin qofka aad rabto inaad magacawdo ama aad shaki ka qabtid musharaxa. Waxaa laga yaabaa in waraysiga labaad aad u baahatid inaad la yeelatid wada hadal dheeraad ah oo aan rasmi ahayn taas oo aad ku dhiirigalinayso wada hadal dheeraad ah oo furfuran iyo is-dhaafsiga fikradaha si aad si fiican wax uga baratid dadka.</p>	
<p>Samee ugu yaraan inaad laba qof oo codsaha aqoon u leh la xiriirtid</p>	<p>Ugu yaraan laba baaritaan tixraac waa in la sameeyaa. Ha aqbalin tixraacyo qoraal ah. Waa inaad had iyo jeer la hadashaa garsooraha.</p> <p>Weydiiso ugu yaraan hal garsoore oo ah codsadaha shaqada qofka uu hadda u shaqeeyo ama qofkii u dambeeyay ee uu usoo shaqeeyay.</p> <p>Waxaa loo baahan yahay in garsoorayaashu ay ahaadaan kuwo si shaqsiyan ah uga warhayay codsadaha shaqada sida uu ula shaqeeyo carruurta.</p> <p><b>Su'aalo waxtar leh:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Miyaad aragtay qofka oo la howlgalaya carruur? Ma qeexi kartaa noocyada cilaqaadka iyo isdhexgalka uu qofku la yeeshay carruurta?</li> <li>• Miyaad shaqaaleysiin lahayd codsadaha shaqada markale?</li> <li>• Ma jiraan wax walaac ah oo aad qabto oo ku saabsan codsadaha shaqada inuu si toos ah ula shaqeeyo carruurta?</li> <li>• Miyaad ku qanacsan tahay ogaanshaha in codsadaha shaqada ay suurtagal noqon karto in mararka qaarkood keligiis la joogi karo carruurta?</li> <li>• Miyaad na siin kartaa tusaale wakhti aad aragtay codsadaha shaqada oo ka falcelinaya xaalad aan sahlaneyn oo ah dabeecadaha carruurta?</li> <li>• Ma jiraan marxalado la xariira tallaaboobin sharci ama dhaqan celis lagu sameeyay qofka ama walaac ku saabsan u hoggaansamidooda Xeerka Anshaxa ee ururka?</li> </ul>	<p>Ururinta macluumaadka ku saabsan musharaxa waxay kaa caawineysaa inaad gaarto go'aanno xog-ogaal ah oo ku saabsan codsaha u qalmida shaqada.</p>
<p>Bixi casharo horudhac ah, kormeeritaan, taageero iyo u kuurgalid ku aadan shaqaalaha iyo mutadawiciinta</p>	<p>Bar shaqaalaha cusub iyo kuwa sida mutadawacnimada ah (volunteers) ku shaqeeyaan ba Nidaamka Badbaadada Carruurta iyo Samaqabka ee ururka (Child Safety and Wellbeing Policy), Xeerka Anshaxa (Code of Conduct) iyo sharciyada iyo habraacyada la xiriira howsha.</p> <p>Bixi tababar joogta ah oo ku saabsan:</p>	<p>Shaqaalaha iyo mutadawiciintu waxay fahansanyihiin sida carruurta nabadqabkooda loo ilaaliyo, looga hortago loona yareeyo waxyeelada ayna u dhaqmi karaan si kalsooni ku dheehan tahay.</p>

Xulashada shaqaale nabdoon iyo tabaruceyaal	Talooyin wax ku ool ah	Natiijooyin wanaagsan
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• sida lagu aqoonsan karo loogana jawaabi karo calaamadaha xadgudubka carruurta iyo waxyeelada</li> <li>• taageerida la siinayo qof shaaca ka qaadaya waxyeelada ilmaha</li> <li>• qiimaynta iyo maaraynta khataraha xadgudubka carruurta iyo waxyeelada</li> <li>• awoodsiinta iyo ka-qaybgalinta carruurta</li> <li>• haynta diiwaanka iyo wadaagista macluumaadka</li> <li>• soo sheegista badbaadada ilmaha iyo waajibaadka jawaab celinta</li> <li>• ammaanka dhaqanka iyo waxqabadka loo wada dhan yahay.</li> </ul> <p>Kormeerka joogtada ah iyo maaraynta shaqaalaha iyo mutadawiciinta waa inay ku jiraan in diiradda la saaro badbaadada carruurta iyo ladnaanta. Tani waxay noqon kartaa iyada oo loo marayo kormeerka shaqaalah joogtada ah, qorshooyinka horumarinta xirfadeed iyo goleyaasha shaqaalaha iyo shirarka.</p> <p>Tallaabo ayaa laga qaadayaa haddii shaqaale ama mutadawiciin aysan u hoggaansamin Xeerka Anshaxa Badbaadada Carruurta iyo Samaqabka (Child Safety and Wellbeing Code of Conduct) ee ururka taas oo ay ku jirto in xubinta shaqaalaha ama tabaruca lagala hadlo arinta iyo hubinta inay beddelaan dhaqankooda.</p>	